

WARSIDAHA

# Somaliland Biodiversity Foundation

somalilandbiodiversity.org | February 2017 | Tirsiga 2aad

## *Aloe orlandi*: Ku mee?

Gu'gii 2006, John Lavranos (xeeldheere cilmiga dhiroonka), ayaa faahfaahin ka bixiyay *Aloe orlandi*, jaad dacarta ka mid ah oo uu Guiseppe Orlando bahda sayniska u diiwaan geliyay, saddex gu' ka hor xilligaas. 2015kii, Tomas Mazuch iyo koox ku wehelisay socdaalkiisii ayaa isku deyay in ay ku laabtaan goobtii dacartaa laga helay, iyaga oo adeegsanaya Hage-asteeye (GPS), tilmaanna ka qaadanayay geed ku ag yaallay goobta dacartaas laga helay. Baadigoob miyir leh kaddib, kumey guulaysan helidda dacartii. Haddaba sidee ayuu arrinku yahay? Mazuch waxa uu qabaa in dacartu meesheedii tahay; se isaga iyo jaalleyaashiisi ay arki waayeen! Waxa se uu niyadsami ku qabaa in sahan ka ballaadhani muujin doono in bulshooyin kale oo dacartaas ah la heli doono.

Kaddib waxa aannu warsannay Lavranos iyo Orlando si aannu u helno aragtidooda. Waxa ay xoojiyeen in Mazuch ku saxan yahay aragtidiisa; dhirtaasi waa ay ku tiil goobtaas, se waa ay ku adkaatay in ay indhahooda ku arkaan. Orlando oo faallo ka bixinayay arrinkan ayaa yidhi "[ *Aloe orlandi*] nasiib iyo indho-fiiqnaan uun baa lagu heli karaa. Weliba buurarkii aan helay halkii ayay weli ku sugan yihiin, maxaa yeelay laba fiil oo yaryar uun baa laga qaaday meesha si ay u koraan oo u ubxiyaan. Hooy-deegaankeeda gaarka u ah ayaa dacartaas ka dhigaya mid ay adag tahay in si fudud loo helo, adiga oo sida aad isaga socoto guudka kaga joogsatid mooyee. Xididdadeeda fidsan ee biyaha keysada ayaa ka yeelsiiya in ay ku tamariso, kuna noolaato degaankaas biyuhu suququlka ku yihiin; caleenteeduna waxa ay ku dhowaataa in ay cidda ku dhex baaba'aan." Lavranos oo isna ka faallooday ayaa qaba, in abaartan jirta awgeed, dacartaas "ay dib ugu guratay dhulka hoostiisa, kolkaas caleentina adag tahay in la arko...". Labadooduba waxa ay soo jeediyeen baadigood kale oo xilli-roobaadka ah ayaa muujin kara tiro kale oo dacartaas ka mid ah. Gooba dacartan laga helay waxa ay u dhexaysaa Ceel-Afweyn iyo Yufle, Gobolka Sanaag.

## Tusmada


- *Aloe orlandi*: Ku mee 1
- Barasho Noole 2
- Wadaajinta Aqoonta 2
- Sahaminta kaymaleyda Dhirta Moxorka iyo Yagcarga (Qaybtii 2aad) 4
- Magacyo 5
- Xididka Galoolka iyo La-Jaanqaadka Cimilada Qarfo-u-eke 6
- Xarunta Keydka Kaladuwanaanshaha Noolaha 7
- Seerihii Geed-deeble 8
- Diin Miranaya 9




Daahfurkii hore ee dacarta *Aloe orlandi* waxa ay ahayd mid lama filaan ah. Orlando, mar uu ku socdaalayay jidka u dhexeeya Ceel Afweyn iyo Ceerigaabo, mar uu goob cidla' ah ku hakaday, aanu se isu taagin daawashada goobktaas ay ka jiraan dhiroon xiise lehi, se isu taagay in uu xaajadiisa guto!

Iyada oo aannu tixgelin siinaynno faalladiisa iyo ta Lavranos, wax noo qorshaysan in aannu booqanno goobtaas xilli roob da'ay kaddib. Haddii aannu helo dhir kale, muunado ayaannu ka soo qaadi si loogu beero meelo kala duwan oo Somaliland ah. Lagana yaabee in goobtaas u muuqata in indhaha laga laliyey aannu ka heli doonno dhiroon kale, oo si la mid ah leh xiise deegaan. Jaadadka dacarta ah ee carriga Soomaalida ka baxa waxa ay tiradoodu ku dhow dahay 30, intooda badanna aan meel kale laga helin adduunka.



# Wadaajinta Aqoonta

Mareegaha internetka waxa laga heli karaa xogo aad u tiro badan oo ku saabsan dhiroonka iyo nooleyaasha kala duwan, se aqoondhaqameed aan baaxaddiisa la koobi karin ayaa ku dhex faafsan bulshooyinka kala duwan ee arlada. Ayaan-darro se, si xawli leh ayaa ay aqoontaasi u sii lumaysaa.

In la daneeyo aqoondhaqameedka jaadkan oo kale ahi waxa ay ku salleedahay runta ah in bulshooyinka kala geddisani la fal galaan nooleyaashaas, isla markaana ay dhaxleen aqoon facaaddu isu soo dhiibdhiibayeen. Aqoondhaqameedku waxa uu lumaa marka ay kala xidhiidh furmadaan bulshooyinkii nooleyaashaa iyo dhiroonkaas la noolaa, ama tayodhac ku yimaaddo deegaankii – taas oo keenta in dadkii u doolaan dhulka benderka ah. SBF-ahaan, waxa aannu isku deyi doonnaa in ay noo dhacaan (aan fahanno) xidhiidhka ka dhexeeya aqoondhaqameedka iyo sayniska, si markaas aannu ugu adeegsanno dadaallada dhowriseed (conservation) iyo soo-noolaynta sabo-deegaaneedyada (ecosystems), kuwa caafimaadka qabana ka talinno sidii halkooda loogu sii hayn lahaa.



## **Barasho Noole:** *Hemidactylus somalicus*



Mar uu Tomas Mazuch baadigoobayay dacarta Aloe orlandi (eeg bogga 1), waxa uu isla goobtii ka helay qorrotadan jaadkeedu yahay Hemidactylus somalicus, oo aaney bahda saynisku dib u arag kaddib markii kornayl ciidamadii Ingiriiska ahaa helay 1932kii.

Tomas waxa uu goobtii ka dhaqaaqay isaga oo raynrayni wejigiisa ka muuqato. Daahfurka Guiseppe Orlando iyo Mazuchba waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa baahida loo qabo in la daraaseeyo sabooyin laga yaabo in aan, inta badan, indhaha dadka soo jiidan.

# Aqoonta waa la Dhinac: Wax-ka-barashada Bulshada

Tallaabada ugu horraysa ee lagu ogaan karo sida ay bulshooyinku u adeegsadaan dhiroonka ay la deriska yihiin ayaa ah ogaanshaha magac-cilmiyeedyada dhirta ay siyaabe kala duwan u adeegsadaan. Axmed Ibraahin Cawaale iyo Mary Barkworth mar ay kal hore dhiroon ka soo ururinayeen buurta Gacan Libaax waxa ay gacan ka heleen Biixi Gurey. Biixi waxa uu Gacan Libaax yimid isaga oo da' yar – dhowr gu' kaddib markii howl-wadeenno Ingiriis ahi bilaabeen waxqabadyo ku aaddan dhowrista deegaanka buurta. Waxa loo shaqaaleeyay in uu dhir-ilaaliye (*forest guard*) ka noqdon buurta, intii uu joogayna waxa uu helay aqoon baaxad weyn leh oo la xidhiidha dhiroonka iyo xawayaanka. Hadda waxa uu ku negi yahay ardaaga hay'adda Candlelight ku leedahay buurta, halkaas oo uu jid mariye (*guide*) u noqdo dadka buurta soo booqda. Biixi waxa uu magacyada Af Soomaaliga ah ee dhirta u balballaadhiyay Axmed Awale iyo Mary, kol ay muunado u diyaarinayeen Xarunta Kaladuwanaansha Noolaha ee Jaamacadda Hargeysa ku dhex taalla. Kaddibna Axmed ayaa sidaas ku raadiyay magacyadii cilmiga ahaa. Kaddibna waxa aannu ku hubinnay faahfaahintii ku muujisnayd buugga *The Flora of Somalia*.




**Biixi Gurey**
*dhir ilaaliye.*

# Sahaminta kaymaleyda Dhirta Moxorka iyo Yagcarga (Qaybtii 2aad)

Dhirtani waa kuwa laga gurto xabkaha qiimaha badan ee beeyada iyo mayddiga ee laga helo Gobolka Sanaag. Sahamintoodii bishii Oktoobar 2017 waxa ay muujisay goobo dhirta ku taal ay ka muuqato adeegsi xad dhaaf ahi, bedqabka dhirtuna hoos u dhacay. Ha yeeshee meelahaas badankoodu waxa ay ahaayeen qaar si fudud loo gaadhi karayay, oo ay u badan tahay in lala beegsaday culays xabag-gurasho. Sahamintii labaad, ee ay wada sameeyeen Dr. Anjanette DeCarlo iyo Stephen Johnson waxa ku jiray dhowr goobood oo waddooyinka ka durugsan, oo aan cagta iyo gacanta lagu badin.

Waxa ay arkeen dhir caafimaad qabta, oo si fiican loo maamulo, nagfiddana aan lagaga badin sidii dhaqanku ahaan jiray (6-12 sarniin), halka meelaha kale ee cagta iyo gacanta lagu badiyay uu dhirta sarniinkoodu gaadhayay labaataneeyo iyo in ka badan. Waxa kale oo goobahaas bed qaba ka muuqday dhir shareer ah, oo ay weheliyaan




qaar badan oo dhulka ka soo biqlaya – taasina muujin u tahay taranta fiican ee dhirta. Ayaan-darro se, hal goob ah oo durugsanayd/weecsanayd oo dhirteeda uu ka muuqday culays manaafacaadsi ayaa jirtay - kaas oo bilaabmay labadii gu' ee u dambeeyay.

Habdhaqankaasina waxa uu soo dedegjin doonaa dhimashadooa. Dhirtan oo kale, boqollaal gu' ayaa ay da'doodu gaadhi kartaa, se dhowr gu' oo si xun loo manaafacaadsado ayaa keeni karta dhimashadooda.

Sahaminta dhirtan xabkahaha laga gurtaa ma dhammays tirna weli;  DeCarlo iyo Johnson waxa ay ilaa hadda dabooleen 25% goobaha ay dhirtani ka baxdo ee Somaliland.  Waxana ay sahamintooda timaaddada dhow ku fidin doonaan goobo kale, se qaabka ay wax u socdaan si cad ayay u muuqdaan: Haddii wax-ka-taransiga dhirtani uu sii jiri doono, isla markaana uu sii ahaan doono isha dhaqaale ee ugu mudan ee ay lee yihiin bulshooyinka la deriska ahi, waa lagama maarmaan in xijiyeysiga xad-dhaafka ahi joogsado. Haddii saridda dhirta lagu ekaysiiyo 6-12 geedkiiba halkii gu'ba, oo ah qaabkii dhaqan ahaan lagu ilaalin jiray dhirta, waxa hubaal ah in wax-ka-taranigoodu sii jiri doono ammin dheer.  Haddii sidan dambe ay dani ugu jirto xijiyeysatada, waxa mudan in bulshooyinkaas loo helo ilo dhaqaale oo kale oo horseeda in uu yaraado ku tiirsanaantooda beeyada iyo mayddiga.  Waxa mudan in iibsadeyaasha caalamiga ahi ay wada shaqayn kala yeesheen xijiyeysatada iyo hoggaamiyeyaashooda dhaqan sidii ay isaga kaashan lahaayeen joogtaynta fayoqabka dhirta iyo in dheef soorani dib ugu noqoto xijiyeysatada.

## Magacyo



Bulshooyinka kala duwani waa ay u magac bixiyaan nooleyaasha ay la fal galaan. Magacyadaasi waxa loo adeegsadaa gudbinta xogaha – fac-ka-fac – haddii ay dawo tahay, adeegsi kale leeyihiin iyo haddii ay dhibaatooyin caafimaad wataan. Magacyada cilmiga ahi waa kawa ay isku fahmi karaan bulshooyinka kala duwan ee arlada ku nooli. Maxaa yeelay, geed ayaa bulshooyin kala duwani magacyo gaar ah ku dhex yeelan kara, se magaca cilmiga ahi waa midka la isku af garan karo. Saas daraaddeed, magacyada cilmiga ah waxa la isugu habeeyaa, ama la isu raacraaciyaa qaab la jaan qaadsan shuruuc iyo tilmaamo lagu dejiyay Kowdhka Caalamiga ah ee Magacbixinta (*International Codes of Nomenclature*).

Qarnigii 17aad, Carol Linnaeus ayuu ahaa ninkii habraac u dhigay magac-bixinta cilmiga ah, se waxa ay ahayd uun bilowgii qarnigii 19aad markii ugu horraysay ee la dejiyay habraac si guud la isugu raacsanyahay ama *International Codes of Nomenclature*. Maanta waxa jira five Kowdh oo ku kala saabsan xayawaanka, *prokaryotes* (baakteeriyuhu ku jiro), iyo fayruusyada, iyo mid ka dhexeeya *algae*, *fungi*, iyo dhiroonka. Kowdh kastaa waxa uu dejiyay shuruuc fududayn kara helidda magaca dhabta ah ee noolaha, kaddib kala-xerayntiisa ama kooxayntiisa meel lagu tiirin karo.

Kala-xerayanta ama kooxaynta (*classification*) waxa loola jeedaa go'aan-ka-gaadhista kooxda noole ama abuur kale lagu ab tiriyo. Bilowgii, kooxaynta waxa lagu salayn jiray oo keliya muuqaalka noolaha; ha yeeshee, sidii kolba loo sii daahfurayay hannaanno hor leh, ayaa tilmaamo dheeraad ahna loo fiiro yeeshay. Maanta in xogo kala duwan loo adeegsado kooxaynta waa arrin la isla meel dhigay. Haddaba marka xog cusubi tibaaxdo in mid sii jirtay dib-u-eegis lagu sameeyo, waxa la doorinayaa (beddelayaa) magacii noolaha – tiiyo magaca cusub loo habaynayo si la jaanqaadsan Kowdhka ku habboon. Tani waa ta dhalisay in noole keliya loo hayo laba (ama in ka badan) magac-cilmi oo sax ah, maxaa yeelay, haddii aysan dadku ka midaysnayn kooxayntiisa, waxa ay weli adeegsan karaan magacyada kala duwan. *Acacia bussei* (Galool) ayaa ka mid ah. Maanta, culimo badan ayaa u taqaanna *Vachellia bussei*. Waa arrin jahowareer abuuri kara, se muujin u ah in magac-cilmiyeedku koobsan karo kolba aqoonta soo korodha.

---

## Qaamuus "Online" ah oo Dhawaaq leh




Soomalidu si xooggan ayay u adeegsataa dhiroonka hareerahooda ka baxa, magacyona waa ay ula baxaan. Aqoonsiga geedka iyo magac bixintiisu waxa ay muhiim u tahay gudbinta aqoondhaqameedka fac-ka-fac iyada oo la adeegsanayo siyaabe kale duwan, sida suugaanta oo kale. Aqoonsiga magaca Soomaaliga ahi waxa uu si la mid ah fududeeyaa astaynta magaca cilmiga ah ee geedka. Waxa hadda muuqata in magacyada dhirta qaarkood, iyada oo ay ku xidhan tahay degaanno kala duwan, si kala duwan loogu kala adeegsado. Waa arrin la fili karo kan oo kale.

Hay'adda SBF waxa ay ku guda jirtaa abuurista qaamuus "online" ah oo isku xidhaya magac-Soomaaliga geedka iyo kiisa cilmiga ah, oo weliba ay weheliso codayn laba dhinac ah (Soomaali iyo Ingiriisi).

# Xididka Galoolka iyo La-Jaanqaadka Cimilada Qarfo-u-eke

A*cacia bussei* [= *Vacchellia bussei*] ama Galool waxa uu noqon karaa midka ugu waxtar roon dhirta carriga Soomaalida ka baxda. Ma laha xabag adduunka laga iibiyo (sida faleenka oo kale), se qayb wal oo ka mid ahi waxtar kala duwan ayay bulshada u lee dahay. Xididdada jiifka u baxa waxa loo adeegsadaa samaynta dhigaha aqal-Soomaaliga; maydhaxda xadhko ayaa laga diyaarshaa, dawo ahaan iyo midabaynbna waa loo adeegsadaa; ulo, kabaallo, budhadh iyo hangoollo ayaa laga diyaarshaa; Caleenta xoolaha ayaa daaqa, mararka qaarkoodna shaah ahaan baa loo adeegsadaa, canbuushana cunno ahaan baa loo cunaa.




Haddaba la-yaab ma laha in galool badani u dhinto adeegsigaas xad'dhaafka ah awgeed. Waxa se jira, arrin kale oo ka qayb qaata hoos-u-dhaciisa (tiro ahaan iyo tayo ahaanba), oo ah qaabdhismeedka xididdadiisa iyo is-beddello saamayntooda leh oo la soo dersay. Gu'gii 1951, P. E. Glover waxa uu ogaaday in xididka jiifka ah ee galoolka uu gaadho 10-15 mitir, se aanu oogada dhulka ka hoosaynin wax ka badan 30 sentimitar oo kaliya. Xididdada jiifka ahi waxa ay geedka u awood siiyaan in uu wax ka taransan karo saansaanka roobyari iyo biyaha roobka oo aan dhulka in door ah hoos ugu dhaadhicin. Se kol haddii ay xididdada jiifka ahi oogada xoog ugu dhow yihiin, waxa ay si fudud ugu ban dhigan yihiin halisaha ka dhasha dhulka oo dirri noqda, iyo ciidguurka. Glover waxa uu baadhitaankiisii ku gunaanaday in waxa dhaliyay in dhir badan oo galool ahi qallalaan ay yihiin dhibaatooyin is-barkan oo arrimahan kore ka mid yihiin.



Kol haddii xididdada jiifka ahi u nugul yihiin dirrinimada, ciidguurka, abaaraha iyo qaawinta dhulka, isla markaana culays badani ka saaran yahay in ay quudiyaan geedka, la-yaab ma laha in galoolku si argagax leh ugu sii yaraanayo dhulka. Diiwaanka hay'adda caalamiga ah ee dhowrista bii'adda (*International Union or the Conservation of Nature – IUCN*) weli geedka galoolku waxa uu ku calaamadsan yahay inuusan "halis badan kuma ku jirin" (least concern), ha yeeshee, waxa ay u muuqataa in IUCN ka eegayso muuqaalka guud ee caalamiga ah. Dhanka gudaha, waxa loo baahan yahay dadaallo lagu dhowrayo, isla markaana dar cusub beeristooda la dhiirri geliyo kol haddii uu wax-taransi weyn oo dhaqandhaqaale leeyahay.

Diyaarinta qoraalka waxa aan la kaashannay baadhis uu sameeyay P. E. Glover oo uu magac bixiyay "*The Root Systems of Some British Somaliland Plants – IV*), kuna soo baxday joornaalka *The East African Agricultural Journal, July 1951*.


---



## Dhirta Jaamacadda Hargeysa

Hay'adda SBF waxa ay beryahanba wadday magac-ku-qoridda dhirta Jaamacadda Hargeysa. Ardayda iyo dadka waageeniga ah ee aan aqoon dhirta u lahayni ayaa ay howshaas hadda ka gacan siin doontaa in ay fahmaan qaar ka mid ah magacyada dhiroonka qoraallada ku soo baxa. Waxa isku hoos qoran magac-Soomaaliga iyo magaca cilmiga ah. Magacayntani waxa ay ardayda gelisay xiise badan, iyada oo qaarkood ay yidhaahdaan "Alla maan moodayn in geedkani hebel yahay!" Magacayntan sidoo kale waxa loo adeegsan karaa kobcinta waxbarashada. Waxa noo qorshaysan in aannu samaynno qaamuus dhegaysi ah oo magacyada dhirta iyo faahfaahin yar geed kasta ka bixinaya.

# Xarunta Keydka Kala-duwanaanshaha Noolaha



Xaruntan oo Jaamacadda Hargeysa ku dhex taalla, agabka yaallaa waa mid kolba sii kordhaya. Waxyaabaha ku soo kordhay wax aka mid ah kabadhka gaarka ah ee kaydinta muunadaha dhiroonka (*herbarium cabinet*) oo Hargeysa lagu sameeyay, iyo weynayso (mikaroskoob) casri ah oo ay ku gudo jirto kamera *digital* ah. Muunadaha dhiroonka hadda looga baqan maayo in ay xumaadaan, kol haddii kabadh aan cayayaan geli karin loo sameeyay. Si habaysan ayaa muunadaha loo xerayn karaa. Mikaroskoobku waxa uu naga gacan siin doonaa in si fiican loo dhugto, loona daraaseeyo dhiroonka. Waxyaabaha kale ee ku soo kordhay agabka xarunta waxa ka mid ah qalab lagu qabqaban karo cayayaanka. Qaarkood Somaliland gudaheeda ayaa timaaddada lagu samayn karaa.

Sababta aannu u danaynaynno cayayaanka waa iyada oo aan xog badan laga haynin kuwa Somaliland laga helo. Waa se jiraan buugaag iyo qoraallo laga qoro xawayaanka kale, shimbiraha, iyo berri-biyoodka. Dhinaca waxbarashada haddii loo adeegsanayo, xasharaadku helitaankoodu waa fududdahay. Waxa kale oo ay kaalin mug leh ku leeyihiin, in kasta oo aan la dhaadin, hodantinnimada deegaanka.

Bishii Jeenaweri, Xarunta waxa soo booqday Guddoomiyaha Jaamacadda Hargeysaa (Dr. Maxamuud Yuusuf), Warsame Mohamud (Agaasimaha Cilmibaadhista ee Jaamacadda), iyo saynisyahanno ka socday Jaamacadda Charles ee dalka Czech. Waxa kale oo soo booqday Dr. Paul Evangelista iyo Nicolas Young oo ka socday Colorado State University, ee dalka Maraykanka. Dhammaantood waxa ay nagu bogaadiyeen waxqabadka SBF iyo sidii la isu kaashan lahaa.

# Kaydhka Xarunta Kala-duwanaanshaha Noolaha oo "Online" ah

Xarunta Kaydka Kala-duwanaanshaha Noolaha (*Biodiversity Museum*) ee Jaamacaddad Hargeysa waxa ay xogta la wadaagtaa laba degel, OpenHerbarium.org and OpenZooMuseum.org. Intii uu soo baxay tirsigii ugu horreeyay ee Warsidaha SBF, waxa kordhay xogaha ku saabsan noolaha ee lala wadaagay, oo ay ku jiraan dhowr ka mid ah jaadadka qorratooyinka ku xusan qoraallada Tomas Mazuch. Mary ayaa iyana ku biirisay OpenHerbarium muuqaallo iyo faahfaahintood.

Waxa kale oo la sameeyay liiska dhirta ka baxda deyr hudheelka Maansoor, halkaas oo ay Mary degganayd in muddo ah. Waxana laga helayaa iyada oo la riixayo badhankana "*Flora Projects*" bogga hore ee OpernHerbarium, kaddibna la dooranayo "Maansoor Hotel". Waxa la arki karaa magacyada ama muuqaallada oo taxan.

Tirakoobka dhirta ku taal huteelka Maansoor, oo ay kooban tahay faa'iidada lag heli karaa, waxa loo soo qaadan karaa tusaale ay ku tababar qaadan karaan ardayda, iyo dadka cilmiga dhirta daneeyaa, si ay u aqoonsan karaan, una daraasayn karaan muunad dhir ah oo degaan kooban ka baxda. Waxa sidan oo kale SBF diyaarin doontaa liiska dhirta Jaamacadda Hargeysa iyo Buurta Gacan Libaax ka baxa.

## Farriin Deegaan

Kol haddii degelkiisa,
Kii lahaa duminaayo,
Ma duulka qalaadbaa,
Diihaal kaa bixinaaya.



# Seerihii Geed-deeble




Geed-deeble waxa degaan 37 km waqooyi kaga beegan Hargeysa. In badan oo bulshada reer Hargeysana ayaa baahidooda biyo ahaaneed ugu tiirsan. Xilligii maamulkii Ingiriiska, degaanka Geed-deeble waxa loo asteeyay dhul loo qoondeeyay ugaadha iyo duurjoogta kale. Waxana laga dhisay guri nasasho oo ay u faxaaxsi tegi jireen dadka reer Hargeysa iyo dad kale oo booqasho u taga. Waxana cad in taasi u dhignayd in la aqoonsaday sifooyinkeeda gaarka ah.

Goobtani keymaley jiq ah ayey ahaan jirtay, oo uu ku badan yahay Qudhacu, ayaan-darro se waxa weerar xooggan ku haya geedka Garanwaaga – jaad ka mid ah dhirta soo-galowtiga ah oo si niyad-wanaag ah markii hore dalka loo soo geliyay, se kaddib noqday geed howl badan. Geed-deeble waxa si sannadle ah u booqan jiray Lord Delamare, oo markii ugu horraysay soo gaadhay Hargeysa 1891kii si uu u ugaadhsado libaaxa; si sannadle ahna soo noqon jiray ilaa 1894, markaas dambe oo uu libaax si xun u dhaawacay, se uu badbaadiyay qori sidihiisii Soomaaliga ahaa. Delamere markii dambe waxa uu degay Kiiniya. Haddaba dhowristii iyo ilaalintaa seeruhu waa sii jiray ilaa ka hor burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya (1991).

20kii Feebaweri, 2017, Khadra Cumar Xasan, Guddoomiyaha hay'adda *Barwaaqo Voluntary Organization* ayaa Axmed Cawaale iyo Mary Barkworth, oo labaduba ka mid yihiin aasaaseyaasha SBF, ku marti qaadday booqashada Geed-deeble. Khadra iyo hay'addeedu waxa ay ku talo jiraan in ay Geed-deeble ka sameeyaan beer-dhireed cilmi-baadhiseed iyo soo-ban-dhigeed (*botanic garden*), iyaga oo maal-gashi ka filaya hay'adda *Horn of Africa Regional Environmental Center and Network (HoA-REC&N)*. Goobta waxa xundhur u ah meel si wacan u dhiraysan oo ay ku yaalliin dhowr geed oo Berde ahi (*Ficus sycomorus*) oo waaweyn. Hadhkooda fidsan ayaa nafta gelinaya dareen degganaansho oo la taaban karo.

Waana dareenka ku dhiirri geliyay carruurtu in ay dhirta ku hoos ciyaaraan, si gaar ahna innamadu, ay ku dhuumaalaystaan god weyn oo ka samaysmay jirridda xordan mid ka mid ah dhirtaas. Waxa kale oo meesha hoos digaafayay riyo u diyaar ah in ay halabsadaan caleentii kasta ee dhirtaas Berdaha ah ka soo dhacda, mar Alle marka ay dabayl yari ruxdo laamahooda cirka ku shareeran. Mid ri' ah oo iska yeelyeelaysa riyo buureed ayaa koraysay jirridda si ay u tiigsato caleemo soo laalaaday. Hay'adda SBF si xooggan ayay u taageersan tahay qorshaha BVO ee samaynta beer cilmi-baadhiseed oo isla markaana looga faa'iideysan karo waxbarashada iyo faxaaxsiga/mijo-baxsiga.





# Diin Miranaya

Waxa ay ahayd bishii Noofambar 2016, mar uu Axmed Cawaale goor habeennimo ah tilifoon ka helay nin xooloraacato ah. Waxa uu u sheegay in uu arkay diin miranaya oo carmo ruugaya! Waxa hadalkiisa ka muuqatay dareen cabsiyeed oo ka aaddan xilliga adag ee lagu jiro iyo runta ah in uusan weligii arag diin miranaya. Waxana uu weyddiiyay: "Axmedow, weligaa ma u soo joogtay, ma se maqashay diin miranaya?" Wax uu Axmed ugu war celiyay: "Maya. Maan arag, mana maqlin."

Diinka waxa lagu yaqaannaa in uu xilliga jiilaalka meel baydhsan ku xeroodo, kaddiba hurdo dheer galo – tiiyoo uu hab-shaqaynta kala duwan ee jidhkiisa si xooggan u dhimo. Waxana uu saansaankaas ku negaadaa inta Jilaal lagu jiro. Waxana uu firfircooni dib u gala xilli roobaadka. Ammintaas kooban ayuu haddaba u howl galaa keyd uu mar kale kaga baxo jiilaalka, iyo weliba in uu tarmo.

Diinka waxa lagu yaqaannaa in uu habeenkii xuluusho meel ooddu cufan tahay, si uu uga badbaado bahalaha ay ka mid yihiin xoorku, oo lugaha ka abbaara, sidaasna ku cuna. Sidaas awgeedna ay dhif tahay in la arko diin habeenkii daaq taga.

Marka loo noqdo aqoondhaqameedka Soomaalida, mirashada diinku waxa ay tilmaan u tahay abaar daba dheeraatay, ama sii jiitami doonta.

# Nagala soo Xidhiidh


Somaliland Biodiversity Foundation
Website: www.somalilandbiodiversity.org
E-mail: aiawaleh@gmail.com; Attn.: Ahmed Awale
Goobta xafiiska: Gudaha Jaamacadda Hargeysa
Cinwaanka dibedda:
Somaliland Biodiversity Foundation
397 Lauralin Drive, Logan, UT 84321, USA
Mary.Barkworth@usu.edu


The Somaliland Biodiversity Foundation is registered as a 501 © (3) organization in the United States.


# Shir Barasho



*Ficus salicifolia*, 'Dhicir'. Waa geed goor walba caleemaysan, caleemihiisuna sun yihiin, waxana xoolaha daaqa lagu arkaa isku daadasho dhinaca neerfiska ah, ugu dambaynna waxa uu sababaa dhimasho. Waxa uu ka baxaa dhulka buuraleyda ah.



Geed gob ah oo ay shimbiro buulal ka samaysteen. Shimbiraha qaarkood, labka ayaa buulal dhowr ah sameeya, oo ay mid ka doortaan dheddigu.; kuwa kalena ay madhnaadaan. Waxa ay falaaddaas loo arki karaa howl meel cidla' lagu lumiyay, se buulalka madhani waxa ay yarayn karaan halista bahalaha ama haadda ukunta cunta. Si kale haddii loo dhigo, waa raad caascaasin.